



## EDEN PRAIRIE SCHOOLS

Inspiring each student every day

Gacaliye Waalid/Masuul:

Eden Prairie Schools  
Child Nutrition Office  
17185 Valley View Road  
Eden Prairie, MN 55346  
Main Office: 952-975-8050  
Fax: 952-975-8052  
www.edenpr.org

Dugsigeenu wuxuu maalin kasta bixiyaa cunto caafimaad leh. Dhammaan ardaydu waxay maalin kasta iskuulka ku heli doonaan hal quraac iyo hal qado oo lacag la'aan ah. In kasta oo aan loo baahnayn arji codsi ah si loo helo dheefta cuntada ee bilaashka ah, buuxinta Codsiga Dheefaha Waxbarashada (Educational Benefits) weli waa muhiim! Ilmahaaga waxa laga yaabaa in ay xaq u yeeshaan dheefaha kale sida kharashka la dhimay ee iskuulka. Codsigaaga waxa kale oo laga yaabaa in uu ka caawiyo iskuulka in uu u qalmo lacagaha waxbarashada, qiimo dhimis, iyo barnaamijyada kale ee cuntada.

Si aad u codsato, buuxi Arjiga ku lifaaqan ee Application for Educational Benefits (Dheefaha Waxbarashada) oo ku celi:

Child Nutrition Office, Attn: Janice  
Eden Prairie Schools  
17185 Valley View Rd.  
Eden Prairie, MN 55346

**Yaa buuxinaya codsigan?** Carruurta reerahoodu ay ka qayb qaataan Barnaamijka Kaalmada Nafaqada ee Dheeraadka ah (Supplemental Nutrition Assistance Program [SNAP]), Barnaamijka Maalgelinta Qoysaska ee Minnesota (Minnesota Family Investment Program [MFIP]) ama Barnaamijka Qaybinta Cunnada ee Degaanada Hindida Mareykanka (Food Distribution Program on Indian Reservations [FDPIR]), iyo korinta caruurta, dadka dibad-jiifka ah, soogalootiga iyo carruurta baxsada ahi xaq ayey u leeyihiin iyaga oo aan soo sheegin dakhliga qoyska. Taas beddelkeeda, carruurta way u qalmi karaan haddii dakhliga qoyskoodu uu yahay mid soo hoos gelaya dakhliga ugu badan ee lagu muujiyey tirada qoyskooda ee tilmaamaha la muujiyay.

### Su'aalaha Guud:

**Waxaan qaataa WIC ama Kaalmada Caafimaadka.** Carruurta qoysaska ka qaybqaata WIC ama Gargaarka Caafimaadka si toos ah xa uguma yeeshaa barnaamijka. Carruurta xaq ayay u yeelan karaan taas oo ku xiran macluumaadka kale ee dhaqaalaha qoyska. Fadlan buuxi codsi.

**Yaan ku daraa xubin qoys ahaan?** Kudar adiga iyo dhammaan dadka kale ee ku nool guriga, qaraabo ha ahaadeen ama yeysan ahaan (sida awoowayaasha/ayeeyayaasha, qaraabada kale ama asxaabta).

**Ma codsan karaa haddii qof qoyskayga ka mid ahi aanu ahayn muwaadin Maraykan ah?** Haa. Adiga ama carruurtaada maaha in aad noqotaan muwaadiniin Maraykan ah si aad u buuxisataan codsi.

**Maxaa dhacaya haddii dakhligaygu markasta aanu isku mid ahayn?** Qor cadadka aad sida caadiga ah lacag ahaan u hesho. Haddii aad caadi ahaan hesho saacadaha dheeraadka ah, ku dar, laakiin ha ku darin haddii aad mararka qaarkood uun hesho saacadaha dheeraadka ah. Dadka shaqaale xilliyeedka ah, ku qor wadarta dakhliga guud ee sanadlaha ah.

**Ma la hubin doonaa macluumaadka dakhliga ama lambarka kiiska ee aan idin siiyo?** Waa laga yaabaa. Waxa kale oo laga yaabaa in aan ku soo waydiino inaad soo dirto caddayn qoraal ah.

**Sidee xogta loo hayn doonaa?** Macluumaadka aad ku bixiso foomka, iyo oggolaanshaha ilmahaaga, waxa loo ilaalin doonaa xog gaar ah ahaan. Wixii macluumaad dheeraad ah, eeg bogga dambe ee Codsiga Faa'idooyinka Waxbarashada (Application for Educational Benefits).

**Haddii aanan hadda u qalmin, ma dalban karaa mar dambe?** Haa. Fadlan buuxi codsiga wakhti kasta haddii dakhligaagu hoos u dhaco, tirada qoyskaagu kor u kaco, ama aad bilowdo inaad hesho dheefaha SNAP, MFIP ama FDPIR.

Haddii aad hayso su'aalo kale ama aad u baahan tahay caawimo, wac 952-975-8055.

Daacadaadii,

Janice Elyea-Wheeler  
Child Nutrition Office

## Sida loo Buuxiyo Codsiga Dheefaha Waxbarasho (Application for Educational Benefits)

Buuxi foomka Codsiga Dheefaha Waxbarashada (Application for Educational Benefits) ee sanad dugsiyeedka 2024–25 haddii mid ka mid ah waxyaalaha soo socda ay khuseeyaan qoyskaaga:

- Xubin kasta oo qoyska ka mid ah ayaa hadda ka qaybqaata Barnaamijka Maalgelinta Qoyska ee Minnesota (Minnesota Family Investment Program [MFIP]), ama Barnaamijka Kaalmada Nafaqada ee Dheeraadka ah (Supplemental Nutrition Assistance Program [SNAP]), ama Barnaamijka Qaybinta Cunnada ee Degaanada Hindida Mareykanka (Food Distribution Program on Indian Reservations [FDPIR]) ama
- Qoyska waxaa ku jira caruur hal ama in ka badan ah oo aha caruurta la korsado (hay'ada samafal ama maxkamad ayaa mas'uul ka ah ilmaha) ama
- Dakhliga guud ee xubnaha qoysku waxa uu ku jiraa hab-raacyada hoos ku xusan (**dakhliga guud ka hor inta aan canshuurta laga jarin**, ma aha lacagta inta guriga loo qaato). Ha ugu darin dakhli ahaan: lacagaha daryeelka caruur korinta, dheefaha waxbarashada federaalka, lacagaha MFIP, ama kharashka kaalmada laga helo SNAP, WIC ama FDPIR. Milatari: Ha ku darin lacaga la siiyo askarka dagaalka ama kaalmada laga helo Hindisaha Guriyeynta Gaarka loo leeyahay ee Milatariga (Military Privatized Housing Initiative). Tilmaamaha dakhliga waxay dhaqan galayaan laga bilaabo Luulyo (July) 1, 2024 illaa Juun 30, 2025.

### Wadarta Dakhliga ugu badan

Tirada qoyska	\$ Sanadkii	\$ Bishii	\$ Laba Jeer Bishii	\$ 2 Todobaadba	\$ Todobaadkii
1	27,861	2,322	1,161	1,072	536
2	37,814	3,152	1,576	1,455	728
3	47,767	3,981	1,991	1,838	919
4	57,720	4,810	2,405	2,220	1,110
5	67,673	5,640	2,820	2,603	1,302
6	77,626	6,469	3,235	2,986	1,493
7	87,579	7,299	3,650	3,369	1,685
8	97,532	8,128	4,064	3,752	1,876
Ku dar qof kasta oo dheeraad ah	9,953	830	415	383	192

#### Tallaabada 1: Caruurta

Soo qor/tax dhammaan dhallaanka iyo carruurta guriga, iskuulkooda iyo fasalka ku jiraan haddii ay khusayso, iyo taariikhda dhalashada. Ku soo lifaaq bog dheeraad ah haddii loo baahdo si aad u taxdo dhammaan carruurta. Calaamadee sanduuqa haddii ilmuhu uu ku jiro daryeelka korinta (wakaalad samafal ama ay maxkamad mas'uul ka tahay ilmaha).

#### Tallaabada 2: Lambarka Kiiska

Haddii xubin qoyska ka mid ahi uu hadda ka qaybqaato barnaamijyada SNAP, MFIP ama FDPIR, ku qor lambarka kiiska ka dibna aad Tallaabada 4. Haddii aadan ka qaybqaadan mid ka mid ah barnaamijyadan, faaruq uga tag talaabada 2 una sii gudub Tallaabada 3.

#### Tallaabada 3: Dakhliga dadka waaweyn iyo carruurta/4 lambar ee u dambeeya ee Lambarka Sooshal Sekuuradka

- Lambarka Sooshal Sekuuradka/Wadarta Xubnaha Qoyska.** Xubin kast oo qaangaar ah oo qoyska ka tirsan waa in uu bixiyaa afarta lambar ee ugu dambeeya ee Lambarkooda Sooshal Sekuuradka ama calaamadee sanduuqa haddii aysan haysan lambarka Sooshal Sekuuradka. Soo gudbi tirada guud ee xubnaha qoyska oo hubi in dhammaan xubnaha qoyska ay mid mid ugu qoan yihiin codsiga qaybta ilmaha ama dadka waaweyn sida ay u khusayso.
- Dakhliga ilmaha.** Haddii ilmo ka mid ah qoyska uu soo galo dakhli joogto ah, sida SSI ama shaqo waqti dhiman (part-time), soo qor wadarta tirada dakhliga caadiga ah ee ay helaan dhammaan carruurta, oo calaamadee sanduuqa inta jeer ay helaan: toddobaadle, laba toddobaad, laba jeer bishii ama bishiiba mar. Ha ku darin dakhliga soo gala marmar uun sida xannaanaynta carruurta ama cawska jariska guryaha.
- Dakhliga dadka waaweyn.** Soo gudbi qaybtaan magacyada xubnaha qoyska ee qaangaarka ah iyo dakhliga ay heleen.
  - Soo qor/tax dhammaan dadka waaweyn ee ku nool guriga ee aan ku qornayn Tallaabada 1, haddii ay qaraabo yihiin iyo haddii kale, sida awoowayaasha/ayeeyoyaasha, qaraabada ama asxaabta.
  - Dakhliga Guud ee Shaqada.** Tani inta badan waa lacagta laga helo ka shaqaynta shaqooyinka markaas oo jeeg mushaar ah la qaato. Dakhli kasta, u calaamadee sanduuq si aad u muujiso inta jeer ee dakhliga la helay: toddobaadle, laba toddobaadle, laba jeer bishii ama bishiiba mar.

- Soo qor/tax dakhliga guud ee ka hor inta aan canshuurka laga jarin, ma aha lacagta aad mushaarka u heshay. Ha qorin mushaarka aad saacaddii ku shaqeyso. Dadka qaangaarka ah ee aan lahayn wax dakhli ah ee ay sheegaan, geli '0' ama ka tag qaybtaas oo bannaan. Dadka shaqaale xilliyeedka ah, ku qor wadarta dakhliga guud ee sanadlaha ah.
- **Ma waxaad tahay iskii u shaqeysta ama beeraley?** Qor dakhliga saafiga ah ee bishii ama sanadka kadib kharashyada ganacsiga. Ha ku qorin codsiga isla dakhligii laba jeer. Khasaaraha ka yimaada beerta ama ganacsiga iskii u shaqeysiga waa in lagu qoraa dakhli 0 (eber) mana yareynayso dakhliga kale.
- **Dakhli Guud ee Kale.** Qor/tax dakhliga guud ka hor inta aan laga jarindhammaan lacagaha ilaha kale, sida SSI, shaqo la'aanta, masruufka carruurta, kaalmada dadweynaha, badbaadada bulshada, dakhliga kiraynta ama gunnada.

**Tallaabada 4:** Saxiixa iyo Macluumaadka lagala Xiriirayo Qofka weyn ee qoyska ka tirsan waa inuu saxeexaa foomka. Haddii aadan rabin in macluumaadkaaga lala wadaago Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka Minnesota (Minnesota Health Care Programs), calaamadee sanduuqa "Ha la wadaagin" ee ku yaal Tallaabada 4.

**Ikhtiyaar ah:** Fadlan soo gudbi macluumaadka ku saabsan qowmiyadda iyo jinsiyadda ee lagaaga codsaday bogga labaad ee foomka. Macluumaadkan looma baahna mana saamaynayo oggolaanshahaaga dheefaha cuntada iskuulka. Xogtu waxay naga caawin doontaa xaqiijinta in aan buuxinayno shuruudaha xuquuqda madaniga ah iyo in aan bulshadeena si buuxda ugu adeegno.

## Codsiga Dheefaha Waxbarashada (Application for Educational Benefits) ee 2024–25

u buuxi hal codsi qoyskiiba carruurta oo dhan. Fadlan isticmaal qalin biire (maya qalin rasaas). **U soo dir ama u soo celi foomka oo buuxa: Eden Prairie Schools Child Nutrition Office, 17185 Valley View Rd., Eden Prairie, MN 55346**

**Tallaabada 1:** **Soo qor/tix Dhammaan Xubnaha Qoyska ee ah dhallaanka, carruurta, iyo ardayda** oo gaarsiiyan ilaa fasalka 12 (haddii boosas badan loo baahan yahay magacyo dheeraad ah, ku soo lifaaq xaashi kale).

**Qeexid:** Xubin Qoyska ka mid ah waa "Qof kasta oo kula nool oo kula wadaaga dakhliga iyo kharashyada, xitaa haddii aanay xiriir kula lahayn." *Akhri Sida loo Buuxiyo Codsiga Dheefaha Waxbarashada wixii macluumaad dheeraad ah.* Dadka qaangaarka ah ee ku jira fasalka 12 waxbarasho ka sareysa ee kugula nool guriga waa in lagu soo sheegaa Tallaabada 3. Haddii carruurtaadu ay dhigtaan degmooyin waxbarasho oo kala duwan ama dugsiyo charter ah/aan dawli ahayn, ku soo dir/celi arji mid kasta.

Magaca Koowaad ee Ilmaha (qor dhammaan carruurta guriga kugula nool)	Bilawga Magaca dhexe	Magaca Dambe ee Ilmaha	Iskoolka	Fasalka	Taariikhda Dhalashada	Ilmaha Korinta ah (v)
						<input type="checkbox"/>
						<input type="checkbox"/>
						<input type="checkbox"/>
						<input type="checkbox"/>
						<input type="checkbox"/>

**Tallaabada 2:** Miyay xubnaha Qoyska (oo adigu ku jirto) hadda ka qaataan mid ama ka badan barnaamijyada gargaarka ee soo socda: SNAP, MFIP ama FDPIR? Gargaarka caafimaadka **uma** qalmo. **Hadii MAYA** > Aad Tallaabada 3.

**Hadii HAA** > Geli SNAP, MFIP ama Lambarka kiiska FDPIR (u dhaxaysa 4-9 lambar, ha qorin sheegin lambarka kaarka EBT) \_\_\_\_\_ Kadib tag Tallaabada 4 ([Ha buuxin Tallaabada 3](#))

**Tallaabada 3:** So gudbi dakhliga dhamaa xubnaha qoyska (ka bood tallaabadan haddii aad 'Haa' kaga jawaabtay Tallaabada 2)

**A. Afarta nambar ee u dambeeya Sooshal Sekuuradka (Social Security Number [SSN])** ee Xubinta Qoyska Qaangaarka ah: **XXX-XX-**     Ama Calaamadee hadii qof weyni **Lahyn SSN:**  **Tirada Guud ee Dhammaan Xubnaha Qoyska**

(Carruurta + Dadka Waaweyn)

**B. Dakhliga Carruurta.** Mararka qaarkood carruurta guriga ku nool waxay helaan ama soo gala dakhli, sida shaqo waqti-dhiman (part time) ama SSI. Fadlan ku dar **wadarta** dakhliga ay helaan dhammaan carruurta ku taxan Tallaabada 1. Ha ku darin dakhliga ay helaan dadka waaweyn

Wadarta Dakhliga ay Helaan Carruurta Dhammaantood	Todobaadle	Labadii-todobaad mar	2x Bishii	Bishii
\$	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>

**C. Dhammaan xubnaha qoyska ee qaangaarka ah (oo adigu ku jirto).** Xubin kasta oo qoyska ka mid ah oo liiska ku qoran, haddii ay helaan dakhli, ka soo gudbi wadarta guud ee dakhliga oo keliya. Haddii uundandakhli meelna ka soo gelin, qor '0' ama ka tag meesha oo bannaan. Waxaad caddaynaysaa (ballan qaadaysaa) in uusan jirin dakhli aad ka soo sheegto. Ma hubo dakhliga halkan lagu soo gudbinayo? Rog bogga oo dib u eeg "Ilaha Dakhliga" wixii macluumaad dheeraada ah. "Ilaha Dakhliga" ayaa kaa caawin doona qaybta dakhliga carruurta iyo Dhammaan Xubnaha Qoyska ee Qaangaarka ah.

Dhammaan Magacyada Xubnaha Qoyska ee qaangaarka ah (Magaca Hore iyo Kan Dambe)
Soo qor dhammaan xubnaha qoyska ee aan ku qornayn Tallaabada 1 (oo aad adigu ku jirto) xitaa haddii aysan dakhli helin. Ku dar carruurta si ku meel gaar ah uga maqan iskuul ama jaamacad/kulliyad.

Dakhliga Guud ee Shaqo kaa soo Gala				
Weekly	Bi-weekly	2x Bishii	Monthly	U soo gudbi dakhliga ka horinta aan la jarin ama cashuurta si guud (ha ku darin sentiyaasha).
<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	\$
<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	\$
<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	\$
<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	\$

Ma waxaad tahay iskii u shaqeysta ama beeraley?		
Monthly	Sanadkii	Dakhliga saafiga ah ee ka yimaada Beerta ama Iskii-u-shaqaystenimo. Meel kale ha ku koobiyeeyn.
<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	\$
<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	\$
<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	\$
<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	\$
<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	\$

Dakhli Guud ee Kasta				
Weekly	Bi-weekly	2x Bishii	Monthly	SSI, Dheefta Shaqo la'aan, Kaalmada Dadweynaha, Masruufka Carruurta, iyo kuwa kale ee muujisan bogga 2
<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	\$
<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	\$
<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	\$
<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	\$
<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	\$

**Tallaabada 4:** Macluumaadka xiriirka iyo saxiixa qaangaarka. "Waxaan cadeynayaa (ballan qaadayaa) in dhammaan macluumaadka codsigan ku qoran ay yihiin run oo dhammaan dakhligiina la soo sheegay. Waan fahamsanahay in xogtan ay tahay mid la xiriirta helitaanka lacagaha Federaalka, iyo in saraakiisha iskuulu ay xaqiijin karaan (hubin karaan) macluumaadka. Waxaan la socdaa in haddii aan si ula kac ah u bixiyo macluumaad been ah, in carruurtaadu ay lumin karaan dheefaha cuntada, waxaana la igu soo oggi karaa dacwo waafaqsan sharciyada Gobolka iyo Federaalka ee ay khuseyso.

Waxaan calaamadeeyay sanduuqan haddii aanan rabin in macluumaadkayga lala wadaago Minnesota Health Care Program sida uu sharcigu ogolaanayo.

Magaca daabacan ee qofka qaangaarka ah ee foomka saxeexaya Taleefoonka Maalintii laga Helo \_\_\_\_\_

Cinwaanka (haddii la heli karo) \_\_\_\_\_ Magalada \_\_\_\_\_ Zibka \_\_\_\_\_

**HALKAAN SAXIIX: Saxiixa Dadka Waawey ee Qoyska** \_\_\_\_\_ **Taariikhda** \_\_\_\_\_

Do Not Fill Out (Ha Buuxin): For School Office Use (Xafiiska Dugsiga uun Istimaalaya)						Verified? Attach Tracker				
Conversions to Annualize All Income:						No change	Free After Verified	Reduced After Verified	Denied After Verified	
	X52	X26	X24	X12	X1					
<b>All Total Income</b> (Include child and adult income)	Weekly	Bi-weekly	2X Month	Monthly	Annualize	<b>Household Size:</b>	Categorical Eligibility	Free	Reduced	Denied
\$	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
<b>Determining Official Signature:</b>						<b>Date:</b>				
<b>Confirming Official Signature:</b>						<b>Date:</b>				

## IKHTIYAAR: Aqoonsiga Jinsiga iyo Qowmiyada Carruurta:

Waxaa nalooga baahan yahay in aan ku waydiino macluumaad ku saabsan jinsiyadda iyo qowmiyadda carruurtaada. Macluumaadkani waa muhiim wuxuuna naga caawiyaa si loo hubiyo in aan si buuxda ugu adeegno bulshadeena. Ka jawaabidda qaybtan waa ikhtiyaari mana saameynayso xaq u yeelashada carruurtaada. Ka jawaab labad tallaabood ee Tallaabada Koow, *Qowmiyada* iyo Tallaabada Labo, *Jinsiga*.

**Tallaabada Koow: Qowmiyada (hal calaamee):**  Hisbaanik ama Laatin  Maaha Hisbaanik ama Laatin

**Tallaabada Labo: Jinsi (calaamad mid ama ka badan):**  Hindi Mareykanka ama Dhaladka Alaska  Aasiyaan  Madow ama Afrikaan Mareykan ah  Dhaladka Hawaay ama kuwo kale oo Jasiiradaha Baasifigga ah  Caddaan

## TILMAAMAHA: Ilaha Dakhliga

### Ilaha dakhliga ee Caruurta

Ilaha Dakhliga Canug	Tusaaleyaal
<ul style="list-style-type: none"> <li>Dakhli Shaqo ka soo galay</li> <li>Sooshal Sekuurad               <ol style="list-style-type: none"> <li>Lacagaha Naafada</li> <li>Dheefaha Qof Dhintay dartiis loo helo</li> </ol> </li> <li>Dakhliga ka yimid qofka ka baxsan qoyska</li> <li>Dakhliga ka soo galay meel kasta oo kale</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ilmuhu wuxuu haystaa shaqo joogto ah oo buuxda ama mid dhiman oo ay ka helaan mushahar ama joornaati</li> <li>Ilmuhu waa indhoole ama waa naafo qaata dheefta Sooshal Sekuuradka</li> <li>Waalidku waa naafo, hawl-gabay, ama dhintay, ilmahooduna waxay helaan dheefta Waalidku waa naafo, hawl-gabay, ama dhintay, ilmahooduna waa helaan</li> <li>Saaxiib ama xubin qaraabo dhow oo qoyska ah ayaa si joogto ah u siiya ilmaha lacag ay isticmaalaan</li> <li>Ilmuhu wuxuu dakhli joogto ah ka helaa sanduuqa hawlgabka ee gaarka ah, magdhaw ama hanti loo hayo</li> </ul>

### Ilaha dakhliga ee Dadka Waaweyn

Dakhli Shaqo ka soo galay	Kaalmada Bulshada / Masruufka furiinka / Masruufka Carruurta	Dakhliyada Kale oo dhan
<ul style="list-style-type: none"> <li>Mushaaraka, joornaatiga, gunnada lacagta caddaanka ah (ka hor inta aan wax laga jarin ama cashuuraha)</li> <li>Dakhliga saafiga ah ee iskii u shaqeystaha ka soo gala (beero ama ganacsi)</li> <li>Haddii aad ka mid tahay Milatariga Mareykanka:               <ol style="list-style-type: none"> <li>Mushaaraka aasaasiga ah iyo lacagaha cadaan ah ee gunnooyinka (HA ku darin mushaharka dagaalka, FSSA ama gunnooyinka guryaha ee gaarka loo leeyahay)</li> <li>Gunnooyinka guryaha ka baxsan xerada ciidamada, cuntada iyo dharka</li> </ol> </li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Kaalmada Lacagta caddaanka ah ee laga helo Gobolka ama dawladda hoose</li> <li>Dakhliga Dheeraadka ah ee Sooshal Sekuuradka</li> <li>Dheefta Shaqo La'aanta</li> <li>Magdhawga shaqaalaha</li> <li>Lacagta Masruufka Xaaska La Furay</li> <li>Lacagaha masruufka ilmaha</li> <li>Dheefaha Askartii Hore</li> <li>Dheefaha Shaqo-joojinta</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Sooshal Sekuurad</li> <li>Dheefaha Naafada</li> <li>Dakhliga joogtada ah ee ka yimaada hanti loo hayo ama dhaxalka loo hayo</li> <li>Maalgashiga faa'iidada sanadlaha ah (Annuities)</li> <li>Dakhliga maalgashiga</li> <li>Dakhliga Kirada</li> <li>Lacagaha caddaanka ah ee caadiga ah ee ka yimaada qoyska dibadiisa</li> </ul>

**Xeerka Qadada Iskuulka Qaranka ee Richard B. Russell (Richard B. Russell National School Lunch Act)** wuxuu u baahan yahay macluumaadka codsigan. Uma baahnid in aad bixiso macluumaadka, laakiin haddii aadan bixin, uma oggolaan karno ilmahaaga cunto bilaash ah ama mid qiimo jaban. Waa inaad ku dartaa afarta nambor ee u dambeeya lambarka Sooshal Sekuuradka ee xubinta qoyska ee qaangaarka ah ee saxiixiday codsiga. Afarta nambor ee ugu dambeeya ee lambarka Sooshal Sekuuradka looma baahna marka aad u codsato magaca ilmo aadan dhalin oo la korinayo (foster) ama aad qortay in aad hesho Barnaamijka Kaalmada Nafaqada ee Dheeraadka ah (Supplemental Nutrition Assistance Program [SNAP]), Barnaamijka Kaalmada Ku-meel-gaadhka ah ee Qoysaska Baahan (Temporary Assistance for Needy Families [TANF]) ama Barnaamijka Qaybinta Cunnada ee Degaanada Hindida (Food Distribution Program on Indian Reservations [FDPIR]) lambarka kiiska ama aqoonsi kale ee FDPIR ee ilmahaaga ama marka aad muujiso in xubnaha qoyska ee qaangaarka ah ee saxiixaya codsiga aanu lahayn lambarka Sooshal Sekuuradka. Waxaan u isticmaali doonaa macluumaadkaaga si aan u go'aamino haddii ilmahaagu u xaq u leeyahay cunto bilaash ah ama mid qiimo jaban, iyo maamulka howsha iyo xoojinta barnaamijyada qadada iyo quraacda. Waxaa laga YAABAA in aan meelo kale la wadaagno macluumaadkaaga xaq u yeelashada barnaamijyada waxbarashada, caafimaadka, iyo nafaqeynta si aan uga caawino inay qiimeeyaan, maalgeliyaan ama go'aansadaan dheefaha barnaamijyadooda, xisaabiyeaasha dib u eegaya barnaamijka, iyo saraakiisha fulinta sharciga si ay uga caawiyaan in ay eegaan xadgudubada xeerarka barnaamijka.

Dugsiyada dawlaga ah, heerka cuntada ee arday kasta waxaa sidoo kale lagu diiwaangeliyaa nidaamka kombiyuutarka gobolka oo dhan ee loo isticmaalo in lagu wargeliyo xogta ardayga MDE sida uu qabo sharciga gobolka. MDE waxay macluumaadkan u isticmaashaa: (1) Maamulka barnaamijyada gobolka iyo federaalka, (2) Xisaabinta lacagaha la siinayo dugsiyada dawlaga ah, iyo (3) Qiimeeyaan tayada barnaamijka waxbarashada gobolka.

**Oraahda takoor la'aanta:** Iyadoo la raacayo sharciga xuquuqda madaniga ah ee federaalka iyo xeerarka iyo siyaasadaha xuquuqaha madaniga ah ee Waaxda Beeraha ee Maraykanka (U.S. Department of Agriculture [USDA]), machadkaan waxaa mamnuuc ka ah takoorida ku salaysan isir, midab, asal qaran, lab ama dheddig (ay ku jirto aqoonsiga jinsiga iyo jihaynta galmada), naafanimada, da'da ama aargoosiga ama u goodin arin hore ee xuquuqda madaniga ah darteed.

Macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luqado aan Ingiriisi ahayn. Dadka naafada ah ee u baahan hab kale oo isgaarsiineed si ay u helaan macluumaadka barnaamijka (tusaale, far waaweyn, cajalad maqal ah, Luqadda Calaadaha Mareykanka), waa inay la xiriiraan hay'ada gobolka ama hay'adda maxalliga ah ee maamulka barnaamijka ama Xarunta USDA's TARGET ee lambarkeedu yahay (202) 720-2600 (cod iyo TTY) ama kala xiriir USDA iyada oo loo marayo Adeegga Gudbinta Federaalka lambarka (800) 877-8339.

Si loo xareeyo cabashada takoorka barnaamijka ah, Qofka Cabanaya waa in uu buuxiyaa Foomka AD-3027, Foomka Cabashada Takoorka ee Barnaamijka USDA (USDA Program Discrimination Complaint) kaas oo laga heli karo onlayn: <https://www.usda.gov/sites/default/files/documents/ad-3027.pdf>, oo laga heli karo xafiis kasta oo USDA, iyada oo la wacayo (866) 632-9992, ama adigoo warqad u qoraya USDA. Warqaddu waa inay ka kooban tahay magaca qofka cabashada qaba, ciwaanka, taleefanka, iyo sharraxaad qoraal ah oo ku saabsan falka takoorka ah ee lagu eedeeyay oo faahfaahsan si loogu wargaliyo Kaaliyaha Xoghayaha Xuquuqda Madaniga (Assistant Secretary for Civil Rights [ASCR]) nooca iyo taariikhda xadgudubka xuquuqda madaniga ah ee lagu eedeeyay. Foomka AD-3027 ama warqadda la buuxiyay waa in loo gudbiyaa USDA iyadoo:

- boostada:** U.S. Department of Agriculture  
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights  
1400 Independence Avenue, SW  
Washington, D.C. 20250-9410; or
- fakis:** (833) 256-1665 ama (202) 690-7442; ama
- iimayl:** [program.intake@usda.gov](mailto:program.intake@usda.gov)

Machadkani waa mid fursadaha uu bixiyo loo siman yahay.